**Hab-raacyada/Tilmaamaha Karantiil Cusub ee CAABUQA COVID-19-ban ee Dugsiyada Ohio**

*Ardayda iyo Shaqaaluhu waa inay "ku dhax xirtaan/ku dhex joogaan "Fool-saabka/Maaskarada" fasalka dhexdiisa*

Isniinta, Waaxda Caafimaadka Ohio (ODH) waxay cusboonaysiisay hab-raaceeda karantiilka ee dugsiyada. Caafimaadka Dadweynaha Columbus (CPH) waxay si buuxda u taageertaa hirgelinta doorashadan cusub ee dugsiyada hoos yimaadda maamulkeeda.

Isbeddellada waxaa ka mid ah xirashada fool-saab/maaskaro iyo baaritaanka si loo yareeyo fursadda faafitaanka CAABUQA COVID-19-ban iyo in la siiyo beddel badbaado leh oo ah karantiilka ka baxsan dugsiga ee ardayda iyo shaqaalaha.

**Dugsiyada Magaalada Columbus, iyagoo la tashanaya Caafimaadka Dadweynaha Columbus, waxay isla markaaba u qaadan doonaan/uhogaan sami doonaan hab-raaca karantiilka cusub** ee ardayda iyo shaqaalaha loo aqoonsaday inay xidhiidh dhow la leeyihiin fasalka ama deegaanka la xidhiidha dugsiga.

CCS waxay sii wadi doontaa inay u baahato waji-xidhka/fool-saabka guud ee gudaha iyada oo aan loo eegin tallaalka ama heerka/xaaladda karantiilka. Ardayda iyo shaqaalaha hadda ku jira karantiilka waxaa loo ogolaan doonaa inay soo laabtaan Jimcaha, 29-ka Oktoobar, ilaa iyo inta aysan muuqan wax astaamo ah.

Isbeddellada ODH waxa ku jira laba kala doorasho/ikhtiyaar:

**Xirashada Joogtada ah ee Fool-saabka/Maaskarada -** waxay khusaysaa ka qayb-galka fasalka dhexdiisa ka dib soo-gaadhista CAABUQA COVID-19-ban ee goob dugsi ama deegaan kale oo la xidhiidha dugsiga.

**Xirashada Joogtada Maaskarada/fool-saabka ee Baarista si looga qayb-qaato Ciyaarta-** waxay khusaysaa ka-qayb-galka wax-qabadyada/hawlaha manhajka ka baxsan ka dib soo-gaadhista CAABUQA COVID-19-ban ee goob dugsi ama deegaan la xidhiidha dugsiga.

Intaa waxaa dheer, CPH waxay xooga saaraysaa kuwa soo socda:

- Xirashada Maaskarada guud iyo xeeladaha kale ee caafimaadka bulshada ee lagu dhimayo/yaraynayo cudurka - kala fogaanshaha bulshada, nadiifinta dusha sare, hawo-qaadista, iwm. - waa in la ilaaliyo.
- Dugsiyadu waa inay sii wadaan inay warbixin ka siiyaan dhammaan kiisaska (24 saacadood gudahood) CPH.
- Doorashadan cusub **ma khusayso xidhiidhada ka dhaca meel ka baxsan goobta dugsiga.** Xidhiidhada qaawan ee ka baxsan goobta dugsiga ama wax-qabadyada/hawlaha la xidhiidha dugsiga waa inay sii wadaan karantiilka haddii aan la tallaalin.

Tilmaamaha/hab-raacyada hoos ku xusan waxay khuseeyaan oo kaliya xidhiidhada tooska ah ee deegaanka dugsiga - dadkaas/shakhsiyaadkaas loo aqoonsaday inay si toos ah u qaaday CAABUQA COVID-19-ban ee  kiis togan/qaba xanuunka ee fasalka ama ah deegaanka la xidhiidha dugsiga.

**Tilmaamaha/hab-raacyada Waaxda Caafimaadka Ohio ee la cusboonaysiiyay:**

**Xirashada Joogtada ah ee Fool-saabka/Maaskarada**

Xidhiidhada tooska ah, iyada oo aan loo eegin tallaalka ama xaaladda waji-xidhka/maaskarada, waxaa laga yaabaa inay ku sii jiraan deegaanka fasalka haddii ay sameeyaan kuwan soo socda:

- Xiro maaskaro 14-ban maalmood ka dib taariikhda ugu dambeysay ee soo-gaadhistooda/qaadistooda.
    - Fadlan ogow: CCS waxay sii wadi doontaa inay uga baahan tahay dhammaan ardayda iyo shaqaalaha inay ku xirtaan maaskaro dhammaan gudaha xarumaha, oo ay ku jirto muddada14-ka maalmood ee la soo dhaafay ee ay ODH sheegtay.
- Is-kormeeridda, ama kormeeridda-waalidka, ee calaamadaha CAABUQA COVID-19-ban.
- Is-go'doomi oo is baar haddii ay bilaabaan inay ka muuqdaan calaamadaha la xiriira CAABUQA COVID-19-ban (iyadoon loo eegayn heerka darnaanta/khatarta).

Xidhiidhada tooska ah ee CAABUQA COVID-19-ban waa dadka/shaqsiyaadka loo aqoonsaday inay si toos ah ula kulmeen shaqsi (yaasha) qaba kiis la xaqiijiyay oo ah CAABUQA COVID-19-ban.

Waalidiinta iyo ardayda ayaa wakiilka ka ah la socodka calaamadaha; si kastaba ha ahaatee, haddii kalkaaliyaasha/shaqaalaha dugsigu ay arkaan ilmo ay ka muuqdaan calaamado waa inay u dhaqmaan si waafaqsan.

**Xirashada Joogtada ee Maaskarada ee Baarista si looga qayb-qaato Ciyaarta**

Xidhiidhada aysan ka muuqan calaamadaga (Asymptomatic contacts) waxay sii wadi karaan inay ka qayb-qaataan wax-qabadyada manhajka ka baxsan haddii ay sameeyaan kuwan soo socda:

- Xiro maaskaro marka aad awooddo. (Tani waxaa ka mid ah: gaadiidka, qolalka dhar-xidhashada; fadhiga/taagnida dhinacyada; iyo mar kasta waji-xidhku/maaskaradu ma faragelin doono xagga neefsashada, wax-qabadka/hawlaha, ama kuma abuuri doono bad-qabka wax khatar ah.)
- Baarista digniintii ugu horeysay ee la kulanka CAABUQA COVID-19-ban.
- Mar labaad baar maalmaha 5-aad-ilaa-7-aad. Haddii ay fayoow yihiin waqtigan, waxay baarista kaga saaraysaa karantiilka.

**Fadlan Ogow:** Baaritaannada kor lagu sheegay waa baaritaannada shaybaadhada SARS-CoV-2 fayraska (PCR ama /ogaanshaha caabuqa neef mareenka/antigen). Waa inay ilaaliyaan/qof uu kormeeraa oo lagama iibsan karo miiska, baaritaan guriga oo ah is-maamul iyada oo aan lahayn kormeerid.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:

- [Columbus Public Health]
- [Ohio Department of Health]
- [CCS Health Hub]

###